

# Mashruuca -Caawinaad (2020)

Mashruuca Caawinaad wuxuu adeeg kaalmo ah u fidinayaa bulshada Soomaaliyeed ee deggan Finland.

Mashruuca waxaad ka heleysaa talosiin caafimaad oo la xiriiirta arimaha korona. Sidoo kale mashruucu wuxuu hiigsan doonaa in la xoojiyo wadashaqeynta ka dhaxeysa ururrada iyo hay'adaha kale, wuxuuna sameyn doonaa macluumaad uruurin si loo horumariyo adeegyada bulshada.


- Mashruucu wuxuu bixinayaa adeeg telefoon iyo talosiin, kaasoo uu bixinayo qof xirfadle ah.
- Mashruucu wuxuu abaabulayaa akhbaar wadaag iyo in dadka laga wacyigaliyo wararka been abuurka ah iyadoo la soo saari doono macluumaad arinkaas khuseeya. Mashruucu wuxuu sidoo kale xoojin doonaa aqoonta guud ee warbaahinta iyo helista warar sugan.
- Mashruucu wuxuu ka shaqeyn doonaa abuuridda jawi wadashaqeyn ah oo dhexmara ururrada Soomaalida, shabakadaha iyo hay'adaha kale ee mashruucu khuseeyo.
- Mashruucu wuxuu hiigsanayaa in la wanaajiyo ka qeyb-ahaanta arrimaha bulshada iyo wadashaqeynta hay'adaha kala duwan.

## Mashruuca kala soo xiriir:

Shaqaalaha mashruuca  
Sagal Ali  
sagal.ali@suomisomaliaseura.fi  
puh. 044 7095885

Isu-duwaha mashruuca  
Yusuf Mohamed  
yusuf.mohamed  
@suomisomaliaseura.fi  
puh. 044 7116680

Mashruuca Caawinaad waxaa maalgeliyey Xarunta caawinta ururada bulshada iyo caafimaadka STEA.



# Wac adeegga mashruuca Caawinaad ee telefoonka lacag la'aanta ah

Talosiinta waxaad ku heli doontaa luuqada Af-Soomaaliga:  
Isniinta, Talaadada iyo Arbacada waqtiga.  
09:00 ilaa 12:00 iyo 13:00 ilaa 14:00

**Lambarka 0800302140**

**Adeegga telefoonku wuxuu bixiyaa talosiin ku saabsan welwelka iyo su'aalaha laga qabo arrimaha korona, wuxuuna kugu hagi doonaa meelaha kale eed adeeg iyo talosiin sax ah ka heleyso.**

Hadafka adeegga telefoonku waa inuu Soomaalida Finland siiyo talooyin la xiriira su'aalaha iyo macluumaadka koronaha, iyadoo mashruucu uu xoojinayo adeegyada kale ee jira.

**Wadashaqeyntu waa midnimo iyo awood!**

Ku soo dhowow talosiinta dhanka telefoonka!

Mashruuca hirgalintiisa waxaa iska kaashanaya: Ururka saaxiibtinimada Finland iyo Soomaaliya iyo Jaaliyadda Soomaalida ee Galbeedka Finland



**Macluumaadka mashruuca**

<https://suomisomaliaseura.fi/caawinaad-hanke/>

**Suomi-Somalia Seura ry**

[info@suomisomaliaseura.fi](mailto:info@suomisomaliaseura.fi)